



Gaadiidka Ardayda Qaada oo Ammaan ah iyo Aqlaaqda Ardayga laga Filanayo



Tixraacyo Sharci Kale ee EEAEC

Sharciga JK iyo JK-R oo ka hadlaya (Aadaabta Ardayga) ayaa ah in la xigmeeyo aadaabta ardayga ee la xiriira aqlaaq xumada ardayda ay ku kacaan inta ay saaran yihiin basaska iskuulka, baabuurta degmo dugsiyeedka, ama gaadiidka uu fidiyo degmado dugsiyeedka ee ardayda ay isticmaalayso.

OGOOW: Xeerarkan waa mid quseeya dariiqyada baska, safarada waxbarashada la xiriira, iyo safarada ciyaaraha loo aado.

1. Mar kasta ka amar qaado darawalka baska iyo kalkaaliyaha baska.
2. Baska halka uu joogsado 10 daqiiqo ka hor tag inta aan la gaarin waqtiga baska yimaado ee subaxdii.
3. Istaag masaafo ammaan ah ee jidka ama laamiga dhinaciisa.
4. Xishmee daraalka / kaalkaaliyaha baska iyo ardayda kale ee baska saaran.
5. Goorta baska aad ka degto oo aad wadada aad goynayso, mar walba ka goy meel 10 fiit u jirta baska hortiisa. Sug calaamadda darawalka ee jid goynta.
6. Si dhaqso ah oo shanqar la'aan ah ku fariiso *kursiga* laguugu talagalay. Kursigaaga ku ekow adiga oo horey-horey u fariista kursiga laguugu talagalay inta baska uu socdo. Mariinka baska marnaba lama xiro karo.
7. Waxaa dhici karta in ardayga loogu baahdo inuu kaarka aqoonsiga tusiyo darawalka baska ama uu siiyo lambarka aqoonsiga ardayda. Tabbarayaasha iyo kuwa kafiisha ayaa mas'uul ka ah in ay ogaadaan ardayda u baxda safarada waxbarashada iyo safarada ciyaaraha.
8. Baska dhexdiisa wax laguma cuni karo, wax laguma cabi karo, xanjo laguma cuni karo ama xandhuuf laguma tufi karo.
9. Baska dhexdiisa waxba ha ku tuurin ama baska inta aad saaran tahay banaanka ha ugu bixin jirkaaga.
10. Si caadi ah u hadal; qaylada, edub darada, af lagaadada waa ka mamnuuc.
11. Ma jiri karto xad gudub xoog isu-sheegasho ah, aqlaaq gardarro ama takoor ama af lagaado loo geysto darawalka ama dadka kale, baska gudhiisa ama dibaddiisa, waa nabad gelyo xumo oo waa mamnuuc.
12. Sharciga gobolka iyo/ama xeerka Degmo dugsiyeedka wuxuu mamnuucayaa walxaha soo socda in baska lala soo fuulo:

Aalkolada/daroogada/sigaarka

Hub ama waxyaabo u eg

Xayawaanno, cayayaan ama xayawaanka boga ku socda (xamaarato)

Walxo dhalo ka samaysan

Walxaha qarxa

Walxaha halista ah ee kale

Waxyaabaha sharci ahaan mamnuuca ah

Bulalayrka (fireworks) (oo uu ku jiro kuwa qiiqa iyo bambka soo ura)

13. Dhammaan walxaha uu wato ardayga (tusaale ahaan, qalabka kooxda, qalabka ciyaaraha, boorsooyinka dhawarka, iwm.) Waqti walba waa in ay gacanta ku haystaan, oo waa in ay laabta ay saartaan ama ay saaran yihiin kursi ammaan ah korkiisa ama korsiga hoos la geliyaa. Walaxaha ardayga uu wato lama saari karo boos arday kale uu ubaahan yahay ama lama dhigi karo darawalka agtiisa, mariinka baska, ama irida baska laga soo galo.
14. Alwaaxa afar shaaglaha ee lagu ordo, mootooyinka iyo kobaha barafka lagu ordo baska iskuulka lama ogola.

15. Ardayda waxaa kaliya loo ogol yahay in ay baska uga degtaan barta baska istaago ee ardayga loogu talagalay. Isbadel kasta waalidka/mas'uulka ayaa loogu baahan yahay in ay sooqoraancodsi, uu ansaxiyay maamulka iskuulka iyo Gaadiidka.
16. Kaliya ardayda iyo shaqaalaha iskuulka ee joogtada ah ee baska ku qoran ayaa kaliya loo ogol yahay in baska iskuulka ay raacaan aysan ka ahayn haddii fasax gaar ah ay ka helaan maamulka Gaadiidka ama sarkaalka iskuulka ee uxil saaran.
17. Ilaali nadaafada baska oo wax waxyeello ah ha gaarsiin.
18. Haddii ay dhacdo in arday uu ku xad gubayo xeerarkan waxaa darawalka baska ama kalkaaliyaha baska ka saaran waajib ah in ay la socodsiiyaan horjoogahooda ama ay la xiriiraan waalidiinta si ay edeb darada ardayga ay ugala hadlaan.

Waxaa dib loo qoray 06/23/14 NP